# Codsigaax ka badelidda adeegga loo baahan yahay

Masuulku wuxuu kala heshiin karaa badeliida mudadda korrinínka curdinka ah ee ilmaha. Fursada doorashadu waa:

- 84 saacadood bishii (waaxda ayaa amreysa xilliyada xanaaneynta)
- 85–106 saacadood bishii
- 107–146 saacadood bishii
- 147–210 saacadood bishii

Heshiiska waxaa la sameynayaa ugu yaraan bil kaasna waxaa lagu badali karaa kaliya si sabab ku saleysan (xaalad qoys, waxbarasho, shaqo la'aan, shaqo ka fadhiisin, shaqaaleysiin ama goobta shaqada oo is badasha). Xilligga fasaxu ma ahan sabab heshiiska loo badalo. Heshiisku wuxuu dhaqan galayaa bisha bilowgeeda, gadaalna lagama sameyn karo. Magaaladda Kouvula wey badali kartaa heshiiska hal dhinac ahaan ah, haddii adeeggii loo baahnaa ee laga heshiiyey laga kor maro.

## Sidan ayaad u sameyneysaa codsiga badelidda baahida adeegga.

1. Gal **arrimah- eVaka** cinwaanka [varhaiskasvatus.kouvola.fi](varhaiskasvatus.kouvola.fi).




2. Dooro ilmaha, kan aad dooneysid inaad codsigiisa u sameysid.

3. Fur **Baahidda adeegga**- barta.



4. Dooro **soo jeedinta badellidda adeegga loo baahan yahay** buuxina codsiga.







5. Ku qor codsiga saacadaha xanaaneynta cadadkooda, tan aad dooneysid in wax ka badelidda lagu sameeyey iyo sababaha wax ka badelidda.
6. Dir codsiga.

Waxaad wargelin ka heleysaa eVakada iyo iimaylka, marka codsiga la aqbalo ama la diiday. Ilmaha waalidkiisa kale wuxuu ka arkayaa codsiga eVakada, laakiin kaliya codsiga waalidka sameeyey oo kaliya ayaa ka noqon kara.

## Xadka saacadaha la qabsanayo iyo kharashka ugu sareeya

| Barbaarinta hore, ma ahan waxbarashada hore | Kharashka ugu sareeya, yuuro/ bishii |
|---|---|
| ugu badnaan 84 saacadood/bishii | 124 |
| 85–106 saacadood/bishii | 187 |
| 107–146 saacadood/bishii | 249 |
| 147–210 saacadood/bishii | 311 |

| Waxbarashada hore uu buuxineysa barbaarinta hore | Kharashka ugu sareeya, yuuro/ bishii |
|---|---|
| ugu badnaan 22 saacadood/ bishii | 62 |
| 23–62 saacadood/ bishii | 124 |
| 63–126 saacadood/ bishii | 187 |

Qeybta waxbarashada hore ee lacag la'aanta ah ee fiirada loo yeeshay 85 saacadood/ bishii

Haddii saacadaha xadeysan ee aad qabsatay bishii ay kor u dhaafto in ka badan laba saacadood, barbaarinta hore kharashkeeda inta dheer waxaa laga soo qaadayaa sida ay dhigayaan saacadaha la xadeeyey bisha xigta bilowgeeda laga bilaabo.